

Taariikhda:

Waalidka/Daryeelaha Gacalka Ahow,

Iskuul Imaanshaha
Wargelin Waalidiinta Loogu Tallo Galay

Mashruuca Wax ka Qabadka Aagga Waxbarashada ee Dingle Garanbi Tokistet (The Dingle Granby Toxteth Education Action Zone) waa barnaamij dowladeed, oo hal-abuur iskuul ama dugsi imaanshaha ka wada iskuulada Aagga ku dhex yaal. Dugsiga uu ilmahaaga dhigtana Aaggan ayuu ku dhex yaal. Waxa aan heynaa koox shaqaale taageero bixiya ah oo dugsiyada Aagga jooga kuwaas oo goortii la doono lagala xiriiri karo 0151 330 4187 si looga helo la tallin, taageero iyo caawinaadba.

Maadaama uu ilmahaaga hadda ka diiwaangashan yahay dugsi goobta ku dhex yal waxaa jirta in ay wargelinta soo socoto kuu sharxeyso waajibaadka kaa saaran inaad hubsato si joogto ah iskuulu imaanshaha ilmahaaga.

- Sharcigu waxa uu dhigayaa in dhamaan carruurta da'da dugsiga gaartay (5 - 16 jirka) ay qasab tahay in ay helaan waxbarasho waqti buuxa ah oo joogto ah.
- Hey'ada Waxbarashada Deggaanka (The Local Education Authority "LEA") waxa ay si wax qiimeyn leh ula socon doontaa sida ay tahay iskuul imaanshaha ardayda oo idil, waxa ayna baaritaan ku sameyn doontaa haddii ay dhacdo in uu ardayga si joogto ah dugsiga uga maqnaado.
- Waa waajib sharci ahaan waalidka u saaran in uu hubsado in ay ilmihiisa uu maalin walba dugsiga waqtigiisa ku yimaado.
- Haddii ay jiraan dhibaatooyin adiga ama ilmahaaga heysta oo kaa horjoogsanaya in si joogto ah u imaanshaha dugsiga, waa lama huraan in aad iskuul ula soo xiriirto sida ugu degdegsiimaha badan ee kuu suurtoogalka ah.
- Iskuulka waxaa farxad gelin doonta in uu kugu caawino wax ka qabashada arimaha ay dhici karto in ay soo farageliyaan waxbarashada ilmahaaga. Haddii kale waxaaba jirta in uu Sarkaalka Samafalka Waxbarashada ay farxad gelin doonto in uu taageero kuu fidiyo.

Waa aad ku mahadsan tahay iskaashiga aad arrintan nagala yeelatay.